# January Somali Webinar Script

**Slide 1:**

Soo dhawaw Bandhigan wuxuu bixinayaa dulmar guud oo ku saabsan dib u eegista lasoo jeediyay ee Early Achievers.  Halkan waxaad ku baran doontaa waxyaabaha ballaaran ee dib-u-eegistayada iyo halka aad ka heli karto macluumaad dheeri ah oo aad la wadaagi karto ra'yigaaga. Anigu waxaan ahay <insert your name>, waxaan wakiil ka ahay Department of Children, Youth, and Families ee iskaashiga dib-u-eegista Early Achievers.  [new speaker] Waxaan ahay <insert your name>, waxaan wakiil uga ahay Child Care Aware ee Washington wada shaqeynta dib u eegista Early Achievers. [last speaker] Aniguna waxaan ahay <insert your name>, waxaanan wakiil uga ahay Cultivate Learning iskaashiga dib-u-eegista Early Achievers.

Early Achievers waxay had iyo jeer ku hawlan tahay nidaam horumarineed oo joogto ah. Sannadkan la soo dhaafay, safmareenku wuxuu noo soo bandhigay fursad aan si hal abuur leh uga fikirno qaababka aan u adeegsan karno tikniyoolajiyadda jirta si aan wax uga qabanno jawaab celinta daneeyayaasha iyo meel marinta dadaallada hagaajinta tayada.

Intii aan ku guda jirnay howshaan waxaan diirada saarnay yoolalka muhiimka ah:

- Ku haynta caruurta wadnaha Early Achievers
- U wareegista nidaamka uu hogaaminayo bixiyuhu ee taageeraya hagaajinta tayada joogtada ah iyadoo diirada la saarayo aqoonsi tayo leh
- Khibradaha aqoonsi tayo leh oo ah tiirarka hoose ee barnaamijyada.
- Nidaamyada ay fududahay in la dhex mushaaxo
- Abbaarida howlaha dhaqan ka la jaanqaadaya ee loogu talagalay daneeyayaasha iyo bixiyeyaasha.
- Xog joogto ah iyo jawaab celin muujineysa awooda barnaamijka iyo fursadaha.
- Daah-furnaan korodhay
- Dadaallada loogu guurayo nidaamka aqoonsiga tayada cunsuriyada ka dhanka ah

**Slide 2:**

DCYF waxay la shaqeyneysay la-hawlgalayaasha tan iyo bishii Abriil si ay u bilaabaan inay ka fikiraan sida loo horumariyo Early Achievers.  Waxaan ku bilownay anaga oo dib u eegis ku sameynay jawaab celintii (Providerska) kaqeybgaleyaashii hore, dib u eegista suugaanta ee ku saabsan hagaajinta tayada joogtada ah iyo aruurinta xogta waxaana samaynay qorshe ku lug lahaanshaha daneeyayaasha ballaaran.  Dayrtaan, waxaan bilownay geedi socod dib u eegis ah oo ay kujiraan daneeyayaal dhowr lakab oo naqshadeyntayada iyo habka go'aan qaadashada ah. Ugu dambeyntiina, DCYF waxay gaari doontaa go'aanka ku saabsan hirgelinta iyadoo la isticmaalayo ra'yi-celinta aan ka helno daneeyayaasha iyo la hawlgalayaashayada.

Inta udhaxeysa Noofeembar 18 iyo Diseembar 14 DCYF waxay martigalisay dib-u-eegista nuxurka iyo tixraacyada jawaab-celinta ee bogga kobcinta Tayada ee Early Achievers ee ku yaala weebsaytka DCYF.

Diseembar, waxaan falanqeynay ra'yi celintaada waxaanna sifeynay soo jeedintayada dib u eegista waxaanna sii wadnay horumarinta tababaraha iyo bixiyaha taageerooyinka Halkan waxaan soconaa Janaayo, oo martigalinayna siminaarkan halkaas oo aan kula wadaagi doonno wixii aan kaa maqalnay dayrtaan, iyo sida ay taasi saameyn ugu yeelatay qorshayaasheena hirgelinta Early Achievers. Hadda waxaad fursad u leedahay inaad la wadaagto fikradahaaga ku saabsan taageerooyinka iyo ilaha ka caawin doona ka qeybgalayaasha inay si raaxo leh ugu lug yeeshaan ururinta xogta aan tooska ahayn iyo tababarista dadban.

Febraayo, DCYF waxay daabici doontaa qorshaha hirgelinta Early Achievers.

Guga, DCYF iyo la-hawlgalayaasheeda waxay bilaabi doonaan tababar ku saabsan cusbooneysiinta Early Achievers ka dibna waxay bilaabi doonaan ka shaqaynta hannaanka ururinta xogta dadban.

Waxaan hirgelin doonnaa xog ururinta gobolka oo dhan iyadoo la adeegsanayo habka dadban ee la cusbooneysiiyey bishii Julaay ee 2021.

**Slide 3:**

Si loo hormariyo sinaanta jinsiyada iyo cadaalada bulshada aakhirkiina aan u noqono nidaam ka soo horjeeda cunsuriyada waa inaan u shaqeynaa si aan u hubinno in dhamaan kooxaha shaqaaluhu ay baaraynaaan sinaan la'aanta ayna ka shaqeynayaan sidii loo naqshadayn lahaa xalka iyadoo la adeegsanayo muraayada sinaanta. Early Achievers waxay hirgelisay adeegsiga aragtida Isbadelka Sinaanta sinjiga ee sannadihii la soo dhaafay. Kheyraadka aasaasiga ah ka sokow waxaan aqbalnay aaladda soo socota ee sinnaanta sinjiga, taas oo laga soo qaatay kheyraadka Magaalada Portland, Oregon iyo Magaalada Boulder, Colorado ay la wadaageen Isbahaysiga Dowladda ee Sinnaanta Sinjiyada. Mid kasta oo ka mid ah Early Achievers wuxuu dib u eegis ku sameynayaa kooxda-shaqaalaha wuxuu adeegsanayaa qaab-dhismeedka iyo taageeridda su'aalaha si loo dhiso ujeedooyinka.

Waxaa muhiim ah in la ogaado, in inta aan ku hirgelinayno agabkan geeddi-socodkeenna aynaan haysan dhammaan jawaabaha ku saabsan waxa ama sida loo beddelo Early Achievers si ay u noqoto cunsuriyad-diid. Waxaan u baahanahay inaan ka maqalno bulshada oo aan si wadajir ah uga wada shaqeyno sidii aan si qoto dheer ugu sii dhex mari lahayn qaab-dhismeedka, siyaasadaha iyo qaababka si aan u fahamno isbeddelada aan u baahan nahay inaan sameyno iyo taageerada aan u baahan nahay in meel la dhigo.

**Slide 4:**

Bogan waa inuu u eekaada mid la yaqaano. Intii aan dib u eegis ku sameynayno Early Achievers waxaan wali ku dadaalaynaa waxbarashada hore ee tayada sare leh iyo taageerida u diyaarsanaanta iskuulka. "Guriga" Early Achievers ka Washington wuxuu bixiyaa qaab dhismeed ka kooban heerarka tayada Early Achievers wuxuuna bixiyaa qaab dhismeed ku saabsan waxqabadyada maalinlaha ah ee wax ku oolka ah ee lagu taageerayo u diyaargarowga carruurta ee iskuulka. Waxaan u adeegsanaa qaab dhismeedka guriga si aan u metelno lix walxood oo muhiim u ah bixinta daryeel tayo leh - hawlgelinta qoyska iyo iskaashiga; is-dhexgalka maalinlaha ah ee carruurta; doorashada iyo hirgelinta manhaj adag; adeegsiga qiimeynta joogtada ah ee xirfadaha carruurta, barida shaqsiyadeed ee canug walba; iyo

bixinta horumar xirfadeed iyo tababar. Qaab dhismeedka gurigeenna, waxyaabahan waxay u dhigmaan, siday isugu xigaan qaybaha guriga: -- albaabka furan, aasaaska, laba tiir, saqaf, iyo dhinac adag - iyo marka midba midka kale lagu xiro, waxay sameysnayaan hal qaab oo kobcinaya barashada iyo horumarka carruurta, iyadoon loo eegin haddii loogu adeegayo guri qoys, xarun ama xanaanada carruurta.

**Slide 5:**

Early Achievers waxay had iyo jeer ku hawlan tahay nidaam kor u qaadis tayo leh oo isdaba joog ah, safmareenka ayaa soo bandhigay fursada looga faa'iideysanayo tiknoolajiyadda si wax looga qabto jawaab celinta daneeyayaasha iyo in la dar-dar geliyo dadaallada hagaajinta tayada.

Soo jeedintan waxay isku dhafaysaa jawaab celinta kaqeybgaleyaasha sanadaha badan ee hirgelinta Early Achievers. Waxaan u isticmaalnay jawaab celintaas inaan dib u qaabeyno Early Achievers si aan u taageerno barashada hore oo tayo sare leh iyadoo loo marayo xogta lagu wargeliyay tababarka.

**Slide 6:**

Halkan waxaa ku yaal tusaalooyin jawaab celin ah oo aan maqalnay sannadihii la soo dhaafay iyo sida aan u rajeynayno dib u eegistaan la soo jeediyay inay wax ka qabtaan caqabadaha.

Waxaad la wadaagtay in heerarka, geeddi-socodka iyo waxyaabaha laga filayo gudaha Early Achievers ay u muuqdeen in gobolku isku dayayo inuu soo saaro cookie gooye barnaamijyada waxbarashada hore — waxaad tilmaantay in nidaam uusan noqon karin hal cabir oo ku filan dhamaan. Si wax looga qabto jawaab celintaan waxaan u qaabeynay macluumaadka barnaamijka si bogag loogu aqoonsado sida goobahoodu u bixiyaan adeegyo tayo sare leh ee waxbarasho hore. Waxaan sidoo kale ka shaqeynay si loo hubiyo in ka qeybgalayaashu ay heleen xulashooyin dheeri ah oo laxiriira sida loo aqoonsaday tayadooda markii ay sii wadeen inay gaaraan heerar tayo sare leh.

**Slide 7:**

<n/a>

**Slide 8:**

<n/a>

**Slide 9:**

(Akhri bogga)

Hadda oo aan dib u eegnay ra'yi celintaadii hore waxay noo ogolaanaysaa inaan eegno macluumaadka aad hadda nala wadaagtay.

**Slide 10:**

Boggan wuxuu muujinayaa tirada dadka ka soo jawaabey sahankeenna. Sahannada waxaa la soo dhigay websaytka Hormarinta Joogtada ah Tayada ee Early Achievers oo ku qoran Ingiriis, Isbaanish iyo Soomaali. Intaa waxaa sii dheer, CCA ee WA waxay la xiriirtay adeeg bixiyeyaasha aan inta badan ka qaybqaadan fursadaha si ay ula wadaagaan ra'yi-celinta. Sida aad aragto, waxaan helnay jawaabo aad u yar. Iyada oo ku saleysan qiimeyntan jawaabta waxaan ognahay inay tahay inaan si fiican u

samayno.  Inta lagu jiro wareegan soo socda ee jawaab celinta wali waxaan heli doonnaa sahamin websaytka DCYF, waxaan la shaqeyn doonaa la-hawlgalayaasha si aan ula xiriirno bixiyeyaasha si toos ah loogu casuumo inay la wadaagaan ra'yigooda, waana sii wadaynaa sahaminta iyo iskudayida kala duwan oo aan uga qaybgelino bulshada si kor loogu qaado wacyi galinta iyo ka qaybgalka bulshada ee dib u eegistayada.

**Slide 11:**

Boggan wuxuu muujinayaa in kastoo inyar oo adeeg bixiyayaashu ay isticmaalaan Tilmaamaha Waxbarashada Hore, aqoonta iyo raaxada ayaa kala duwan yihiin. Tilmaamaha Wax Barashada Hore waxay dhiirrigeliyaan habka cunugga oo dhan oo garwaaqsada, xurmeeya una oggolaada kala duwanaanshaha jira ee carruurta iyo qoysaska.  Aaladan wuxuu kaa caawin kartaa inaad aqoonsato oo aad u dabaal degto waxay carruurtu bartaan waxayna kaa caawin kartaa qorsheynta gobollada soo socda ee koritaanka iyo horumarka.  Sidoo kale waa muhiim in lala wadaago in kuwani lagu horumariyey Washington laakiin waxay ka tarjumayaan heerarka waxbarasho ee federaalka, gobolka iyo qabiilada.  Waxaan ka shaqeyneynaa inaan hubino in tababarayaashu iyo bixiyeyaashu ay ogaadaan sida loo helo loona isticmaalo Tilmaamaha Waxbarashada Hore iyo fahamka sida ay ula jaan qaadayaan dhammaan shaqooyinkii ay ka qabteen Early Achievers waqtiyadii hore.

**Slide 12:**

Dulmarkan u dhaxeeya heerarka Early Achievers, Aqoonta Muhiimka ah iyo Tilmaamaha Waxbarashada Hore iyo Hormarinta.  Bixiyeyaasha iyo tababarayaashu waxay u adeegsan karaan qalabkan si ay u arkaan isku xirnaanta iyo isku dheellitirka heerarka oo ay u sheegaan tayada horumarinta safarkaaga.

**Slide 13:**

Bixiyeyaasha ka jawaabey sahankan, in yar ayaa si fiican aqoon u lahaa  ama u isticmaali jiray S Coaching Companion si joogto ah.  Cultivate Learning waxay la shaqeyneysaa tababarayaal si ay uga caawiso inay bartaan Coaching Companion si loo taageero bixiyeyaasha adeegsiga madasha.  Kheyraad badan oo loogu talagalay tababarayaasha iyo bixiyeyaasha ayaa ku jira horumarin iyo sidoo kale barnaamijka app ka casriga ah.

**Slide 14:**

Halkan waxaan ku aragnaa in inta badan bixiyeyaasha ka jawaabey sahanka ay la kulmeen caqabado.  Kuwani waxay u dhexeeyaan wakhti kadib si ay u bartaan nidaamka cusub illaa adeegyada internetka ee la isku halleyn karo.  Waxaan sidoo kale weydiinay sida bixiyeyaashu u rabaan inay taageero u helaan.  Waxaan soo saareynaa khayraad qaabab kala duwan ah sida Tilmaamaha Talaabada-Talaabada ah, fiidiyowyada tababarka, waraaqaha tilmaamaha, fiidiyoowga tilmaamaha degdegga ah, iyo taageerada tababaraha.  Nidaam khadka tooska ah ayaa u shaqeyn doona bixiyeyaal badan.  Waxaan garwaaqsan nahay inay jiraan caqabado teknolojiyadeed oo la xiriira adeeg bixiyaasha qaarkood iyo sidoo kale tixgelinno dhaqameed xaddidaya adeegsiga tikniyoolajiyadda  DCYF iyo la-hawlgalayaasheeda waxay sii wadi doonaan la shaqaynta bulshada si loo horumariyo dhaqan ahaan ka jawaab celinta iyo xalka sinnaanta ee aqoonsi tayo leh.

**Slide 15:**

Muuqaalkani wuxuu bixinayaa aragti guud oo ku saabsan hannaanka ka qeybgalka ee la soo jeediyey.  Iyada oo ku saleysan xogta iyo jawaab celinta, waxaan ognahay in tababarku uu ahaa taageero qiimo leh oo loogu talagalay hormarinta tayada.  Marka waxaan si ula kac ah u dhex galnay tababarka inta ka qeybgalka Early Achievers iyo nidaamka aqoonsiga tayada.  Waxaan sidoo kale fahannay muhiimada dabacsanaanta si adeeg bixiyeyaasha kaladuwan ee ka kala yimid gobolka oo dhan ay u kala doortaan sida ay u muujiyaan tayadooda markay u shaqeeyaan heerka qiimeynta ay rabaan.  Nidaamkan dib loo eegay wuxuu taageeraa aqoonsiga hormarinta waqtiga kadib halkii booqasho hal xog aruurin ah.

**Slide 16:**

<n/a>